# Waa Maxay Sayniska Akhriska?

## Xogo aasaas ah oo Loogu talagalay Qoysaska

Sayniska akhrisku waa uruurinta sii kordheysa oo la xariirta macluumaadka cilmi baarista taas oo muujinaysa sida maskaxda dadka qaabka ugu fiican ugu barto akhriska iyo wax qorista.

Saynisyahano nooc kasta ah (kuwa waxbarashada, neerfayaasha, luuqada-hadalka, iyo kuwo kale oo badan) ayaa baaritaano ku sameeyay sida dadku u bartaan akhriska *waxayna* tijaabiyeen habka ugu wanaagsan ee macalimiintu dadka u baraan akhriska iyo qorista.

## Sidee sayniska loogu dhex adeegsadaa dugsiyada?

Dugsiyada gobalka Ohio waxaa looga baahan yahay inay doortaan qalabyada la ansixiyay si ay dadka u baraan akhriska ku saleysan uruurintaan cilmi-baarista. Marka ardaydu ku dhibtoonayaan akhriska, waxaa jira agabyo iyo istaraatiijiyado dheeraad ah oo dugsiyadu u isticmaali karaan si ay u taageeraan ardayda. Ma dooneysaa inaad wax badan ka ogaato? Akhri Xeerka Dib loo eegay ee Ohio (Ohio Revised Code) (Sharciga Ohio) 3313.6028 waxaadna ka heli kartaa liiska la Ansixiyay ee Fanka Luuqada Ingiriiska manhajka aasaasiga ah iuo agabyada waxbarashada ee ku jira webseedka Waaxda Shaqada iyo Shaqaalaha ee Ohio.

## Maxay u baahan yihiin ardayda in la baro, sida ku xusan cilmi baarista?

- Inay maqlaan dhawaaqyada iyo xarafyada erayada lagu hadlo
- Magacyada xarafyada, sida loo qoro xarafyada, iyo xiriirka dhawaaqa kala dhaxeeya xarafka
- Sida loogu dhawaaqo erayada
- Sida loo adeegsado dhawaaqa erayga si loo hikaadiyo
- Sida erayada loogu adeegsado in lagu abuuro jumlado (garaamar)
- Sida fikradaha looga dhigi karo farqo iyo qoraal dheer oo wax badan la qori karo
- Micnaha erayga ayadoo la adeegsanaayo qaybaha erayga (xarafyada hore, aasaaska, xarafyada dambe)
- Erayada aan la aqoon si kor loogu qaado erayada cusub
- Qaababka macnaha ugu badan loogala soo baxo qoraalada akhriska dheer

Si ay u noqdaan akhristayaal iyo qorayaal aad u fiican, ardaydu waa inuu si toos ah u baraa akhriska iyo qorista macalinka, lana siiyo nidaam lagu baraayo xirfadaha aasaasiga ah marka koowaad. Waxaan ognahay in xirfadaha cusub ee akhriska ay tahay in la soo bandhigo hal mar, iyadoo fursado badan ay ardaydu u helayaan xirfadaha ay horay u barteen. Waxaan ugu yeernaa nidaamkaan barida akhriska iyo qorista Akhriska iyo Qoraalka La Qaabeeyay.

## Muxuu akhrisku caqabad ugu yahay qaar kamid ah carruurta?

Barashada hadalka waa wax qaab dabiici ah u hesho badan maskaxdeena. Waxay dhacdaa anagoo barasho gaar ah helin. Nidaamkeena wax qorista waa mid ku saleysan koodh la abuuray mana ahan wax qaab dabiiici ah maskaxdeenu u barato. Nidaamkeena wax qorista wuxuu u adeegsadaa xarafyada sida calaamado matalaaya dhawaaqyada hadalka. Waa in nala baro sida calaamadaha, marka la isku geeyo, u abuuraan erayo una sameeyaan micno. Nidaamka akhriska ee wanaagsan wuxuu gacan ka geystaa isku xirka aagaga luuqada lagu hadlo ee maskaxdeena iyo aagaga aqoonsiga calaamadaha (xarafyada) ee la arki karo. Marka la sameeyo muraajaceyn badan, maskaxdu waxay abuuraysaa nidaam ay ku arkayso erayga qoran waxayna isla markiina aqoonsaneysaa labadab micnahiisa iyo sida loogu dhawaaqo. Baro xog ku saabsan cilada keenta akhrin la'aanta, waa saameyn karta barashada sida wax loo akhri oo sameysa 1 kamid ah 5 tii qof.

## Waa maxay sababta dugsiyada, waalidiinta, iyo dadka kale ee gacanta ka geysta horumarka akhriska iyo qoraalka ay muhiim u tahay inay tixgeliyaan sayniska akhriska?

Waqtigii hore, kuleejyada iyo jaamacadaha ma aysan barin dhammaan macallimiinta sayniska akhriska. Waxay inta badan baraan macalimiinta sida ay u bixin lahaayeen waxbarashada akhriska iyagoo adeegsanaya habab kale sida Akhriska Isku dheelitiran ama Luuqada oo dhan. Qaar ka mid ah shirkadaha waaweyn ee u qorayay manhajka dugsiyada ayaa sidoo kale u sheegay dugsiyada inay isticmaalaan agab aan ku saleysneyn sayniska, sanado badan. Arrintaasna waxay keentay, in qoysas badan ay ku qasbanaadaan inay bixiyaan lacag loogu talagalay tuushin qaali ah iyo tijaabo ka baxsan nidaamka dugsiga si ay u ogaadaan sababta carruurtooda aysan u akhrin karin qoraalada, gaar ahaan haddii cunugoodu qabo ciladaha keenta wax akhrin la'aanta.

Gobolka Ohio iyo inta badan gobolada kale, sharciyo iyo siyaasado ayaa la dejiyay si dugsiyadu ay u baraan ardayda akhris ku saleysan sayniska akhriska. Macalimiinta waxaa la siiyaa tababar iyo ilo si loo hubiyo in ay raacaan sayniska marka ay barayaan akhriska, dhammaan qaybaha maadooyinka. Laakiin, wali waxaa jira agabyo badan iyo habab waxbarasho oo la isticmaalo oo aan raacin sayniska.

## Waxa sayniska akhriska uusan sameyn

- Waa muddo gaaban ama wax hadda socda oo dhammaan doona, ama meesha ka bixi doona
- Barnaamij ama manhaj gaar ah
- Hab qoraalka erayada ama xiriirka dhawaaqa kala dhaxeeya xarafka

## Calaamadaha muujinaaya inaan sayniska akhriska aan la adeegsan

- Marka dugsigu uusan isticmaalayn nidaamka waxbarashada si uu ardayda u baro xirfado akhriska iyo qoraal intii muddo ah, ayagoo ardaydu helayaan fursado badan oo ay ku sameeyaan muraajaco.
- U sheegida ilmo inuu akhriyo eray asagoo ku saleynaaya sawirada, ama sheeko, ama xarafka koowaad oo keliya.

- Waydiinta ardayda inay akhriska u adeegsadaan tilmaanta sida “Ma kula saxan tahay?”; “Dhawaaqu ma kula saxan yahay?”; “Ma sameynaysaa micno?”; “Eraygu ma u muuqdaa eray kale oo aad taqaano?”
- Qiyaasida in ilmo oggaan doono sida loo akhriyo loona hikaadiyo kadib marka uu akhriyo in badan ama loo akhriyo ayadoon la barin sida loo akhriyo erayada.
- Muuqaalo ku sawirida aagaga erayada.
- Hawlaha “Ku saleysan hab fakarka” sida “isku tilaab ku sameynta laynka dhexe.”
- Baxnaaninta aragtida iyo isticmaalida qoraal kore oo midab leh.
- U sheegida ilmo inuu xifdiyo erayada oo dhan.
- Tijaabinta xirfadaha akhriska ee ilmaha ayadoo la adeegsanaayo nidaamka saddexda-tilmaan sida diiwaanada xawaaraha/diiwaanada akhriska.
- Diirad saariista “jeclaanta akhriska” ayadoon ilmaha la barin *sida* wax loo akhriyo.
- U sheegida ardayda inay akhriyaan buugaag aan la xariirin “heerarka” sayniska (oo mararka qaar loo yaqaan Heerarka Akhristayaasha) halkii laga siin lahaa buugaagta ay ka baran karaan sida wax loo akhriyo kuna saleysan xirfadaha ay horey u barteen.

Xarunta Ka qaybgalka Qoyska ee Gobolka Ohio waxay iskaashi la sameysay Waaxda Shaqada iyo Shaqaalaha ee Ohio iyo qoysaska Ohio si ay u horumariyaan macluumaadkaan.

## Qaababka Lagu Barto Xog dheeraad ah

1. Daaqo muuqaal ku saabsan sayniska akhriska
2. Waydii dugsigaaga su'aalo gaar ah iyo u doodis
3. Hel ilo dheeraad ah oo loogu talagalay waalidiinta lagana heli karo webseedka Xarunta Ka-Qaybqaadashada Qoyska ee Gobolka Ohio oo Dhan
4. Iimayl ku dir su'aalahaaga ku saabsan macluumaadkaan oo ku dir ReadOhio@education.ohio.gov.